

Nadaamka hagaagsan ee iskuulka Åsgård



Adiga ardayga ah waa in:

- Aan cidina kugu dulmaynin iskuulka gudhiisa ama wadada iskuulka iyo guriga u dhaxaysa.
- Lagu takooreeyn.
- Lagu soo dhawaynayo, aadna amaan dareemi doonto.
- Waxaad heli meel ku haboon waxbarasho.
- Waxaad dhigan iskuul nadiif ah oo ka qurxoon gudaha iyo dibadaba.

Sidaa darted waa inaad:

- Tixgalisaa oo add caawisaa dhamaan.
- Ixtiraamtaa ardada kale iyo shaqaalaha iskuulka.
- U sheegtaa shaqaalaha iskuulka hadii uu qof hanuunsado ama wax aan habooneyn sameeyo- ma aha rufyaanimu ama tiftif.
- U ogolaataa ilmaha kale in ay idinla cayaaraan – cidana ma dareemi doonto kalinimo.
- Ka fogaataa cayaar kasta oo adiga ama cidkale wax u dhimi karta.
- Ku jirtaa xeradda iskuulka daqiiqadaha nasashada.
- Ku timaadaa waqtiga ilaalisaana balamaha.
- Dhagaysataa warbixinada ay ku siiyaan shaqaalaha iskuulka.
- U hogaansataa xeerarka galaaskaaga u yaala.

- U hogaansataa nadaamka isticmaalka barxada iskuulka.
- Ka qayb qaadataa sidii uu iskuulku gude iyo dibadba uga noqon lahaa nadiif iyo mid qorxoon intaba.
- Ka qaybqaadataa xafidida alaabta iskuulka iyo taadaba.

Nadaamyo kale:

- Bushkileeti ama baaskiil iyo koofiyadiisa waxaa iskuulka la imaan kara ardada fasalka 5aad iyo wixii ka sareeya.
- Bushkileeti/baaskiil iyo aaladaha kale ee lawato waxaa la dhigayaa meelaha loo calaamadeeyay, lamana wadan karo xiliyada nasashada hadii aadan ogolaansho ka haysan macalin.
- Lama ogola isticmaalka taleefanka gacanta xiliga iskuulka ama “SFO”ga.
- Baraf iskutuurka waxaa la ogol yahay oo kaliya meel cayiman.
- Nacnac iyo wixii lamid ah waxaa la ogol yahay oo kaliya marka fasax laga haysto shaqaalaha iskuulka.

Cigaabaaha marka nadaamka la jabsho:

Mar walba waxaa lagu ogol yahay inaad iska warbixiso inta aanan go’aan kale la qaadan:

- Waxaa kula hadlaya macalin/shaqaale ama maamulaha.
- Waalidka waa lagu wargalinayaa nidaamka la jabiyay.
- Waxaa lagaa saari karaa xisada/ama daqiidaha nasashada, ayadoo lagu saaridoono ilaalo gaar ah inta ka dhiman saacada/daqiiqadaha ama maalinka.
- Waxaa adiga iyo waalidkaaba la idiinku yeeri doonaa kulan.
- Qalabka iskuulka ama ardayda ee la waxyeleeyo waa lasoo gudayaa/magdhabayaa.
- Hadii qalab loo isticmaalo si aan waa faqsanayn nadaamka lagaagana digay, waa lagaa qaadi karaa.
- Xiisada aad si wanaagsan uga faa’iidaysan waydo daganaasho la’aan awgeed, buuq ama soo daahid iwm, waxaa laguugu celin karaa xiliga nasashada ama iskuulka kadib. Waalidkaana waa la ogaysiinayaa.
- Waxaa lagaa cayrin karaa iskuulka xisad gaar ah ama maalinka oo dhan.

Go’aan aan waafaqsanayn nadaamka wanaagsan ee iskuulka, lama fulin karo ayada oo aan ogolaansho laga haysan waalidka. Nadaamkan waa loo faahfaahshay fasalada.

Nadaamka waalidiinta:

- Si aad u caawiso ilmahaaga, wax wanaagsan uga sheeg iskuulka.
- Si dagdag ah u soo wargali iskuulka hadii ay dhaceen wax u baahan in la saxo.

Qoraalka nadaamka hagaagsan waxaa la go'aamiyay 13.06.2007 ayadoo lala kaashanayo gudiga wada shaqaynta ee iskuulka Åsgård, kadib markay wakaalad ka heleen madaxa kobcinta iyo dhaqanka ee dagmada ÅS.

Nadaamkani waxaa uu waafaqsan yahay sharciga waxbarashada qodabkiisa § 2-9 iyo farqadiisa §§ 9°-1, 9°-4 iyo 9-5.

Nadaamkan waa qoraal ku xiran sharciga maamulaka qodabkiisa §2aad.

Hayadaha ama ururada uu quseeyo waxaa ay yeelanayaan cod ay wax kaga oran karaan inta aan qoraalkan la go'aansan, wax laga badalin ama aan la laalin, sida ku cad sharciga maamulka qodobkiisa §37aad.

Qoraalkani waa inuu buuxshaa shuruudaha sharciga maamulka qodobkiisa §38aad.